
SERVING CANADIANS

# Xadgudbku waa khalad luqad kastaba ha ahaatee



Abuse is wrong in any language

La violence est inacceptable peu importe la langue

虐待是有悖文明的恶行。

El abuso es condenable en cualquier idioma

ਦੁਰਵਿਵਹਾਰ ਕਿਸੇ ਵੀ ਬੋਲੀ ਵਿੱਚ ਨਜਾਇਜ਼ ਹੈ

Az erőzak minden nyelven helytelen

Zlostavljanje je zločin na svim jezicima

Violenţa este inacceptabilă în orice limbă

Keqtrajtimi eshte i padrejte Ne te gjitha gjuhet e botes

Týrání je nepřijatelné v kazdém jazyce

Kunyanyaswa si mazuri katika kila lugha

ማጎሳቆል በማንኛውም ቋንቋ ስህተት ነው

العنف ممنوع في جميع اللغات

Department of Justice Canada
Ministère de la Justice Canada
Canada

Macluumaadka Warbixinta la Dabaabaco ee Canada.

Macluumaadka muhiimka ah ee Cinwaanka ka hooseeyo:
Xadgudbuku waa khalad luqad kastaba ha ahaatee
Main entry under title:
Abuse is wrong in any language

Sidoo kale ku daabacan luqadda Faransiiska iyadoo cinwaanku yahay:
La violence est inacceptable peu importe la langue
ISBN 978-0-662-03027-0
Cat. no J2-131/2008So

1. Ku xadgudubka xaaska – Canada
2. Haweenka hijrada ku yimaad – Dambiyada laga galo – Canada
3. Canada. Waaxda Caddaaladda

HV6626.23C3A38 1995 362.829'2'0971 C95-980093-X

Kani waa mashruuca Warbixinta iyo Waxbarashada Sharciga Dadweynaha oo laga sameeyay Ololaha Rabshadaha Qoyska ee Wasaaradda Caddaaladda.

Waxaa la soo daabacay iyadoo ay fasaxeen Wasaaradda Caddaaladda iyo Xeer Ilaaliyaha Guud ee Canada

ay soo gudbisay
Waaxda Caddaaladda ee Canada
Ottawa, Ontario
K1A 0H8

©Minister of Public Works and Government Services Canada
2008
Waxaa lagu daabacay Canada

Waxaad koobi ka sameysan kartaa buug-warbixineedkan adigoo aan fasax ka haysan Waaxda Caddaaladda, waa haddii macluumaadka si sax ah loo daabaco oo la tilmaamo cidda soo saartay. Haddii si kale loo isticmaalayo macluumaadka waxaa loo baahan yahay in fasax laga helo Waaxda.

(Somali)

# Tusmada Qoraalka

Mahad Celinta....2
Ku saabsan buug warbixineedkan....2
Waa maxay xadgudbku?....3
Caawinaad ayaa la helayaa....5
Halkeen ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah?....6
Keligaa ma tihid....6
Adigu khaladka ma lihid....6
Carruurtaadu waxay u baahan yihiin in la badbaadiyo....7
Ma waxaa habboon in la iska joogo ama in laga tago?....8
Maxaa dhacaya haddii aad go'aansato in aad joogtid?....9
Maxaa u xal ah haysashada carruurta?....10
Haddii aad isaga tagto xaalad xadgudub leh, miyaa lagaa saarayaa Canada?....11
Haddii uu burburo xiriirka kaala dhaxeeya qofka ku kafaala qaaday, miyaa lagaa saarayaa Canada?....12
Waa maxay nooca gargaarka ee aad heli kartid?....12
Maxaa dhacaaya haddii…?....13
Jirdilka ma aha nooca kaliya ee xadgudubka....15
Haddii lagugu xadgudbo....15
Waxyaabaha aad qaadan kartid haddii aad isaga tagayso....16
Ereyada loo isticmaalay buug warbixineedkan....17
Liiska Ilaha Bulshada....19

## Mahad Celinta

Waaxda Caddaaladda waxay uga mahad celinayaan Public Legal Education and Information Service of New Brunswick (Adeegga Macluumaadka iyo Waxbarashada Sharciga Dadweynaha ee New Brunswick) in ay u suurageliyeen in la adeegsado daabacaadda aan rasmiga ahayn si looga sameeyo buug warbixineedkan.

Waaxda Caddaaladda waxay sidoo kale uga mahad celinayaan qaybtii ay ka qaateen PLEI Network (Xiriirka PLEI); asaxaabta iyo dhulalka Qaybaha Caddaaladda iyo Xeer Ilaaliyeyaasha Guud; Waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadda ee Canada; Waaxda Hiddaha Canada; Caafimaadka Canada; Horumarinta Ilaha Dadweynaha ee Canada; Qareenka Guud ee Canada; Heerka Haweenka Canada. (F.G. Waaxyada waxaa la magacaabay xilligii ay ka qayb qaateen.)

Buug warbixineedkan waxaa la soo saaray iyadoo wadatashi lala yeeshay xubnaha ka tirsan kooxaha dhaqanka iyo kooxaha bulshada ee Canada. Waxaannu ku faraxsan nahay dhammaan dadkii ka qayb qaatay hawshaan, waxaana uga mahad celinaynaa qaybtii muhiimka ahayd ee ay ka qaateen.

## Ku saabsan buug warbixineedkan

Buug warbixineedka waxaa loogu talagalay haweenka hijrada iyo qaxooti ahaan u yimaad ee uu xadgudub ka haysto xiriirka ama reerkooda. Haddii aad taqaan qof lagu xadgudbay, waxaad siisaa buug warbixineedkan. Waxaad weydiisaa haddii ay caawinaad u baahan tahay. Waxaa suuragal ah in ay taageero u baahan tahay. Waxaad u sheegtaa in ay kaligeed ahayn.

Inkastoo buug warbixineedkan loogu talagalay dadka hijrada ku yimaad iyo haweenka qaxootiga, waxaa sidoo kale khalad ah in ragga lagu xadgudbo. Qofkasta oo ay dhibaato ka soo gaarto xadgudubka waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay caawinaad raadsadaan.

### *Ku socota akhristaha*

Haddii aad tahay haween hijra ama qaxooti ku timid, waxaad moodaa in aad keligaa ku tahay. Waxaa suuragal ah in aad dhibaato ku qabtid in aad dadka la hadashid. Haddii lagugu xadgudbo, waxaad u cabsootaa naftaada iyo carruurtaadaba.

Waxaa mudan in aad wax dheeraad ah ka ogaato sharciga Canada, xuquuqahaaga, iyo nooca caawinaadda ee aad heli kartid haddii lagugu xadgudbo.

## Waa maxay xadgudubku?

Waxaa lagugu xadgudbay marka qof kale uu kuu geysto jirdil ama si xun uu kugula dhaqmo.

Xadgudubku wuxuu noqon karaa mid dhibaato u geysta jirka, galmada, niyadda, maskaxda ama lacagta. Waxaa suuragal ah in ay kula soo gudboonaadaan in ka badan hal nooc oo xadgudub ah.

Caadi ahaan qofka kugu xadgudbaayo waa qofka aad is qabtaan, qofkii aad hore isu qabi jirteen, saaxib ama saaxib hore. Mararka qaarkooda qof ka tirsan reerkaaga ama qofka aad is qabtaan ama reerka qofka aad is qabtaan ayaa ah qofka xadgudubka geysta. Qofka xadgudubka geysta wuxuu noqon karaa rag ama dumar.

## Xaaladda degdegga ah

Waxaad wacdaa booliska ama wac qof aad saaxib tihiin haddii ay suuragal tahay.

Dibedda u baxso si ay dadka kuu arkaan (aan ka ahayn marka aad isleedahay gudaha ayaad badbaadaysaa).

Qeyli – si ay deriska kuu maqlaan oo ay booliska ugu yeedhaan.

Tusaalooyinka **jirdilka** waxaa ka mid ah:

- garaacid
- qanjaruufo
- dharbaaxo
- riixid
- feedh
- haraati
- gubid
- xabadeyn
- mindi gelin ama goyn

Kuwaan ayaa ah tusaalooyinka falalka dambiyada weerarka ee Canada ka dhaca.

**Ku xadgudubka galmada** waxaa ka mid ah taabashada nooca galmada ama xarakada galmada adigoo aan raalli ka ahayn.

Kani sidoo kale waa nooc ka mid ah dambiyada Canada ka jira.

**Xadgudubka niyadda ama maskaxda** waxaa ka mid noqon kara:

- hanjabaad ama dhibaateyn laguu geysto ama loo geysto qof aad taqaan
- wax jebinta ama dhibaateynta xayawaankaaga rabaayadda ama hanjabaadda in sidaasi la sameyn doono
- in lagu dabagalo (dhibaateynta dambiga ah)

Kuwaan ayaa ah dambiyada ka jira Canada.

Tusaalooyinka **xadgudubka lacagta** waxaa ka mid ah:

- in lagaa qaato jeeggaaga mushaharka
- in lagaa haysto lacagtaada oo aadan ku soo iibsan karin waxyaabaha aad adiga ama carruurtaada doonayaan, sida cuntada, hoyga ama daaweynta caafimaadka.

Kuwaan ayaa ah dambiyada ka jira Canada.

Noocyada kale ee xadgudubka ayaan ahayn dambiyo, haddana waa khalad, qofna xaq uma laha in uu waxyaabahan kugula kaco. Tusaalooyinka qaarkooda waxaa ka mid ah:

- in lagu sharaf tiro
- in aflagaado laguu geysto
- in la iska kaa dhagatiro
- in lagugu qeyliyo
- in magacyo lagugu yeedho
- in lagaa gooyo asaxabtaada iyo reerkaaga
- in laguu sheego waxa aad sameyn kartid ama aadan sameyn karin, meesha aad tagi kartid iyo cidda aad la socon kartid
- in laguu diido wax lacag ah

## Caawinaad ayaa la helayaa

Waxaa jiraan dad ku caawini kara.

Waxaad wacdaa ururrada dhaqanada kala duwan ama koox u adeegta dadka ku yimaad hijrada ama qaxootiga. Waxaad ogaataa nooca gargaarka ee ay bixiyaan. Waxaad weydiisaa meesha kale ee aad wacayso ama aad gargaar u doonanayso.

Waxaad wacdaa booliska. Waxay idin badbaadinayaan adiga iyo carruurtaada.

Sidoo kale waxaad heli kartaa

- latalin iyo talosiin
- meel aad joogto ee aad ku badbaadid
- gargaar lacageed
- gargaar sharciyeed, oo bilaash noqon kara
- gargaar aad ku baxayso – waxaad tagi kartaa maxkamadda si aad u codsato in carruurtaada aad haysato, in aad heshid taageero lacageed, ama furriin.
- amarka ammaan gelinta ee ay bixiso maxkamadda dambiyada ee kaa celinaya in uu qof kula soo xiriiro si uu kuu dhibaateeyo ama hanjabo.
- amarka ay soo saaraan maxkamadda qoyska ama madaniga

Sidoo kale waxaad helaysaa gargaar haddii aad go'aansato in aad joogtid.

## Halkeed ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah?

- hoyga badbaadada haweenka (tusaale ahaan, YWCA)
- booliska
- xafiiska qareenka xeer ilaalinta
- isbitaallada
- ururrada dhaqanada kala duwan
- xarumaha haweenka
- khadka dhibaatooyinka ee taleefoonka
- ururrada macluumaadka iyo waxbarashada sharciga dadweynaha
- adeegyada tixraaca qareenka
- xafiisyada gargaarka sharciga
- dhakhtarka ama kalkaalisada caafimaadka dadweynaha
- shaqaalaha bulshada


## Keligaa ma tihid

Xadgudubku wuxuu ka jiraa qoysaska oo idil. Wuxuu saameeyaa dadweynaha reer Canada iyo dadka hijrada ku yimaad. Wuxuu saameeyaa haweenka carruurta leh iyo haweenka ee aan carruurta lahayn, kuwa taajirka ah ama ama fakhriga ah, khubarada iyo hooyooyinka gurijooga ah, dhallinyarada iyo waayeelka. Wuxuu saameeyaa haweenka meel kasta oo ay ka yimaadiin oo ku kala duwan diinta, jinsiga, dhaqannada iyo asalkooda. Xadgudubka wuxuu imaan karaa xilli kasta inta uu xiriirka jiro.

## Adigu khaladka ma lihid

In xadgudubka laga hadlo wuxuu noqon karaa wax dhib badan. Haween badan ee lagu xadgudbo waxay dareemaan xishood amaba waxay ka cabsadaan in reerkooda iyo asaxaabtooda aysan rumeysan doonin. Balse, waxaad xusuusataa – wax kasta ee aad sameysidba cidna xaq uma laha in ay kugu xadgudbaan. Marmarsiimo ma laha xagudubku. Adigu khaladka ma lihid

Haween badan waxay ogaadeen in uu jiro wareeg xadgudubka ah. Xiisadda waxay tarmaysaa in muddo ah illaa uu qofka xadgudbaayo uu u dhaqmo si rabshad leh. "Qaraxa" ama rabshadda kaddib, waxaa xigaya muddo aamusnaan ama degganaan leh. Waxaa suuragal ah in qofka xadgudbaya uu raalli codsado ama uu ballan qaado in aysan dib u dhici doonin. Hase ahaatee, muddo kaddib, xiisadda ayaa tarmaysa kaddibna qofka xadgudbaya ayaa markale rabshad ku kaca. Wareegga xadgudubka ayaa halkaasi ka soconaya.




## Carruurtaadu waxay u baahan yihiin in la badbaadiyo

Waa arrin adag in ay carruurta arkaan ama maqlaan waalid lagu xadgudbaayo. Waxay saameyn kartaa dhaqanka, caafimaadka maskaxda iyo jirka, sharaftooda, waxbarashada dugsiga. Sidoo kale waxay saameyn kartaa sida ilmaha ay u dhex galaan carruurta kale. Wiilasha xadgudubka ku arka qoysaskooda ayaa suuragal ah marka ay koraan in ay iyaguna ku xadgudbaan xaasaskooda ama saaxiibtooda. Gabdhaha ayaa suuragal ah marka ay koraan oo ay xiriir yeeshaan in ay aqbalaan xadgudubka oo ay u arkaan inuu yahay qaab nolosha ka mid ah.

Waalid ahaan, haddii aad tahay dhibbane lagu xadgudbay waxay adkeynaysaa in aad carruurtaada daryeesho. Carruurta iyagoo daawanaya waxay ka bartaan qofka kugu xadgudbaayo in aan lagu qaddarin. Xadgdubka ayaa noqon karo mid awoodda ku tira, kaasoo hoos u dhigaya tamarta aad carruurtaada kula wadaagi lahayd.

Haddii uu qofkaasi uu carruurtaada ku xadgudbo, waa in aad gargaar u heshid. Ku xadgudubka carruurta ayaa ah fal sharciga ka soo horjeedo. Waxaad talosiin, caawimaad ama latalin ugu tagi kartaa hay'adda daryeelka carruurta ama adeegyada qoysaska. Waa in carruurta ay ka badbaadaan in lagu xadgudubo.

## Ma waxaa habboon in la iska joogo ama in laga tago?

Waa in aad marka hore ka fakartid amnigaaga iyo amniga carruurtaada. Waxaa suuragal ah in aad ka cabsi qabtid in reerkaaga ama asaxaabtaada aadan taageero ka helin haddii aad isaga tagtid. Tani waa mid dhici karta. Balse xittaa haddii ay dhacdo, way idiin habboonaan kartaa adiga iyo carruurtaada intii aad ku sii jiri lahaydeen xadgudubka.

Waxaad xulan kartaa in aad muddo gaaban ama si joogta ah isaga tagtid. Midna labada xulasho macnahoodu ma aha in guurkaaga ama xiriirkaaga dhammaado. Marka aad go'aanka gaaraysid, waxaad isweydiisa:

- Waa maxay khatarta ay leedahay in aad iska joogtid?
- Miyuu qofka kugu xadgudbaya hore xanuun kuu geystay?
- Miyuu qofka kugu xadgudbaya hore u isticmaalay hub, sida mindi ama ul, si uu waxyeello kuu gaarsiiyo?
- Baastoolad miyeey taal guriga?
- Miyuu qofka kugu xadgudba isticmaalaa mukhaadaraad ama cabaa khamri badan?

## Maxaa dhacaya haddii aad go'aansato in aad joogtid?

Waxaad go'aansan kartaa in ay kuu habboon tahay in aad halkaaga iska joogtid.

Haddii lagu dhaawacay, waa in aad raadsatid daryeel caafimaad. Shardi ma ahan in aad cid sheegtid qofka dhaawaca kuu geystay. Balse waxaa ku habboon daaweyntaada in aad dhakhtarkaaga u sheegtid sida saxda ah ee ay wax u dhaceen.

In aad haysato qoraal ama xusuus-qor ay ku yaalliin xilliyada lagu dhaawacay ee lagugu xadgudbay waxay ku caawini karaan marka aad xilli dambe go'aansatid in aad halkaasi isaga tagto. Waxaa fikrad fiican ah in uu diyaar kuu ahaado qorshe haddii aad u baahatid in aad dhaqsi u baxsato.

Bogagga hore buugga taleefoonka waxaa ku yaal liiska taleefoonada booliska iyo adeegyada degdegga ah. Waa fikrad fiican in aad baratid lambarka taleefoonka booliska haddii aad gargaar u baahatid. Haddii ay timaado xaalad degdeg ah, waxaad wici kartaa 911.

Waxaad soo uruursataa, sida cinwaanada iyo lambarrada taleefoonada dadka kuu gargaari kara. Haddii ay suuragal tahay, waxaad kaydsataa lacag.

Waxaad tijaabisaa in aad sameysid wixii dareen fiican ku siinaya. Waxaad raadsan kartaa latalin ama baran kartaa xirfado shaqo ee cusub. Waxaad raadsataa asaxaab iyo dad reerka ka tirsan ee ku caawini kara.

Haddii qofka kugu xadgudba uu doonayo in uu beddelo sida uu u dhaqmo, wuxuu raadsan karaa latalin. Caawinaad muddo dheer kaddib, dadka falalka xadgudubka ku kaca qaarkooda waxay barteen in ay joojiyaan. Balse way adag tahay dadka hore u rabshad badnaa si ay isku beddelaan. Caadi ahaan xadgudubka wuu ka sii daraa markii muddo la joogo.

## Maxaa u xal ah haysashada carruurta?

Haddii aad ka baxsato xaalad xadgudub leh, waxaad codsan kartaa in aad carruurtaada haysatid.

Haddii aad ku fakarayso in carruurtaada ay khatar ku jiraan, hore u kaxeyso marka aad tagayso. Waxaad si dhaqsi leh uga codsataa maxkamadda amarka haysashada. Qareen ayaa kaa caawini kara. Qareenkaaga ayaa sidoo kale kaa caawini kara in maxkamadda laga codsado in aabbaha carruurtaada uu bixiyo lacagta masruufka ee adiga iyo carruurtaada. Waxay maxkamadda go'aankeeda ku saleynaysaa wixii fiican ee u dan ah carruurta.

Haddii la oggolaado in aad carruurta haysatid, waxay u badan tahay in aabbahooda uu soo booqan doono. Waxaa habboon in aad diyaar ka dhigato in qof kale uu halkaasi joogo marka aabbaha uu soo doonayo carruurta ama uu soo celinaayo. Haddii aad ka walwal qabtid amniga carruurtaada, qareenkaaga ayaa maxkamadda ka codsan kara in uu qof halkaasi joogo xilliga booqashada.

U sheeg qareenkaaga haddii aabbaha carruurtaada ama qof kale ay isku dayayaan in ay carruurta dalka ka saaraan. Haddii aad maxkamadda ka codsatid, waxay maxkamadda amraysaa in baasaboorka carruurta ay maxkamadda hayso.

Haddii ay carruurta haystaan jinsiyadda Canada, waxaad ka wacdaa Xafiiska Baasaboorka taleefoonka 1-800-567-6868 ama adeegyada TTY taleefoonka 1-866-255-7655. Waxaad ka codsataa in ay carruurta ku daraan liiska si laguu soo waco haddii uu qof isku dayo in uu baasaboor u codsado. Haddii ay carruurtaada haystaan jinsiyad kale, waxaad la xiriirtaa safaaradda ama qunsuliyadda si aad uga codsatid in carruurtaada loo diido baasaboorada.

Haddii aad qabtid amarka haysashada, waxaa habboon in aad koobi haysatid, waa haddii ay dhibaato dhacdo. Sidoo kale waxaad koobi siin kartaa dugsiga carruurtaada.

## Haddii aad isaga tagto xaalad xadgudub leh, miyaa lagaa saarayaa Canada?

Haddii aad qabtid jinsiyadda Canada ama sharciga degganaanta joogtada ah ma lagaa saari karo Canada haddii aad isaga tagtid xaalad xadgudub leh. (Sharciga degganaanta joogtada ah waxaa mararka qaarkood loo yaqaan hijrada imaatinka.) Haddii aadan aqoon u lahayn haddii aad qabtid jinsiyadda Canada ama sharciga degganaanta joogtada ah, waxaad wacdaa xafiiska Jinsiyadda. Waxaad ka eegtaa buugga taleefoonka baluugga ah qaybta Jinsiyadda iyo Socdaalka.

Haddii hore loo go'aamiyey in aad tahay qof qaxooti ah ama qof u baahan badbaado, waxaad iskaa u codsan kartaa in aad heshid sharciga degganaanta joogtada ah. Haddii aad tahay qof ku xiran qaxooti ama qof badbaado u baahan oo ay u socoto nidaamka lagu codsanaayo sharciga degganaanta joogtada ee labadiina, dib ayuu codsiga ula noqon karaa. Sidaa darteed, waxaad u codsan kartaa sharciga degganaanta joogtada ah qaab aadminimo iyo naxariis ku saleysan. Waxay noqonaysaa in aad si caddaan ah u soo bandhigtid sababta aad Canada u joogayso, mana jirto wax xaqiijinaya in aad ku guuleysanayso.

Haddii aad gudbisay codsiga badbaadada qaxootiga oo ku lifaaqan codsiga qofka kugu xadgudba, waxaad codsan kartaa in codsigaaga gaar laga dhigo. Kaddibna waxaa si gaar ah laguugu qabanayaa dhageysiga waxaadna heli doontaa go'aan gaar ahaan adiga kugu saleysan.

Waxaa habboon in aad tixgeliso in aad hesho latalin sharciyeed. Haddii aad lacag siisid qof ku caawiyo, waa in uu ahaado qof qareen ah, arday uu qareen kormeerayo, qof ka tirsan Chambre des notaires du Québec, ama qof ka tirsan Canadian Society of Immigration Consultants (Latalinta Socdaalka ee Bulshada Canada.) Waxaad wacdaa qaybta deegaankaaga ee Xarunta Socdaalka Canada si aad warbixin dheeraad ah u hesho. Waxaad ka eegtaa buugga baluugga ah qaybta Jinsiyadda iyo Socdaalka.

## Haddii uu burburo xiriirka kaala dhaxeeya qofka ku kafaala qaaday, miyaa lagaa saarayaa Canada?

Haddii aad tahay qof hijra ku yimid ee la kafaala qaaday, lagaama saari doono Canada xiriirkaagii oo burburay awadiis. (Waxaad sidoo kale eegtaa Gargaarka Lacagta.)

## Waa maxay nooca gargaarka ee aad heli kartid?

### Booliiska

Waxaad wici kartaa booliiska haddii uu ku weeraro qofka kugu xadgudba ama uu kuu sheego in uu sidaa sameyn doono. Booliiska ayaa u imaan doona in ay ku caawiyaan. Saraakiisha booliiska badankooda waxaa loo tababaray in ay wax ka qabtaa xadgudubka qoysaska iyo dadka uu xiriirka ka dhaxeeyo. Sidoo kale waxay ku geyn karaan isbitaalka haddii aad daaweyn u baahan tahay, ama waxay kaa caawini karaan in aad si badbaado leh aad halkaasi isaga tagtid.

### Hoyga badbaadada haweenka

Waxaad tagi kartaa hoyga badbaadada haddii uu mid ku yaal agagaarkaaga. Waa meel lagu badbaado ee aad adiga iyo carruurtaada joogi kartaan dhowr maalmood ama asbuuc. Iyadoo ay ku xiran tahay hadba lacagta aad haysatid, waxaa suuragal ah in lagaa codsado in aad bixiso kharashka qayb inta aad joogtid.

Shaqaalaha iyo dadka tabarruca ku shaqeeya ee hoyga badbaadada ayaa ku siin doona taageero iyo macluumaad. Waxay kaa caawini karaan in aad heshid latalin sharciyeed, gargaar lacageed iyo meel cusub oo aad ku noolaato, haddii ay tahay waxa aad doonayso. Sidoo kale waxay qabaan cunto, dhar, dhaybar iyo alaabta carruurta ku ciyaaraan, haddii aadan qabin waqti aad alaabta ku xirato. Uma sheegayaan halka aad joogtid qofka xadgudubka kugu sameeyo.

Hoyga badbaadada waxaa maamulaan kooxaha bulshada. Lambarradooda taleefoonka waxaa caadi ahaan laga helaa bogagga ugu horreeya ee buugga taleefoonka iyadoo aad weliba helayso lambarro kale ee gargaarka degdegga ah. Sidoo kale waxaad wici kartaa hoyga badbaadada si talo laguu siiyo. Ma aha in aad magacaaga u sheegtid.

### Gargaarka lacagta

Waxaad u baahan kartaa macaawino ama gargaarka lacagta. Haddii aad qabtid sharciga degganaanta joogtada ah ama jinsiyadda, waxaad u qalantaa in aad codsatid macaawino ama gargaarka lacagta ee kale. Haddii aadan ahayn, waad codsan kartaa, iyadoo ay ku xiran tahay meesha aad ku nooshahay. Gobollada iyo deegaanka waxay kala leeyihiin sharciyo kala duwan ee ku saabsan gargaarka lacagta. Waxaad wacdaa xafiiska maamulka gobolka ama dhulalka si aad wadatashi ula yeelatid.

Haddii aad tahay qof hijra ku yimid ee la kafaala qaaday meesha ugu horreysa ee aad lacagta ka helaysid waa qofka ku kafaala qaaday, balse haddii ay kafaaladdaadu burburtay waxaa suuragal ah in aad dawladda ka heshid gargaar lacageed.

Haddii aad haatan heshid gargaarka lacagta iyadoo laguu tixgeliyo Qaxooti ay Dawladda Caawiso ama Qaxooti si Gaar ah loo Kafaala Qaaday, gargaarkaagu looma baabi'in doono haddii aad ka baxsatay xaalad xadgudub leh. Dawladda ama koox gaar ah ee ku kafaala qaaday waxay sii wadayaan in ay kaa caawiyaan baahidaada illaa inta aad u qalantid. Waxaad la xiriirtaa Xarunta Socdaalka Canada ee deegaankaaga, hay'adda sida gaarka ah u kafaala qaaday ama hay'adda adeegga bixisa si aad u baratid xuquqahaaga islamarkaana aad u heshid gargaarka aad u baahan tahay.

Marka aad tagtid maxkamadda si aad u codsatid heysashada carruurta ama aad u heshid go'aanka furriinka, waxaad maxkamadda ka codsan kartaa in lagu amro aabbaha carruurtaada in uu bixiyo lacagta taageerada masruufka ee adiga iyo carruurtaada.

## Maxaa dhacaaya haddii…?

### Maxaa dhacaaya haddii aad ka warbixiso qofka xadgudubka kugu sameeyo?

Haddii booliiska ay qabaan sabab ay ku aaminaan in lagu weeraray, qofka xadgudubka geystay waxaa lagu eedeyn karaa dambi. Waa in aad booliiska wax uga sheegtid xadgudubka laguu geystay. Booliiska waxay kaloo xiri karaan qofka xadgudubka kuu geystay, haddii ay qabaan in ay jirto sabab ay sidaa u sameeyaan.

Haddii la xiro qofka xadgudubka geystay, waxaa suuragal ah in uu xabsiga ku jiro dhowr saacadood oo kaliya illaa uu maxkamadda ka soo hor istaagayo dhageysiga damiinashada. Wixii markaasi ka dambeeya, waxaa suuragal ah in loo oggolaado in uu baxo, aan ka ahayn marka ay maxkamadda go'aansato in ay jirto sabab fiican ee xabsiga loogu sii haayo.

Haddii aad u cabsi qabtid amnigaaga, u sheeg booliiska inta uusan qofka kugu xadgudbay tagin. Waxay maxkamadda shuruudo ku xiri kartaa sii deyntiisa. Tusaale ahaan, waxay maxkamadda amri kartaa in qofka kugu xadgudbay uusan ku soo wicin ama ku arag. Haddii qofka kugu xadgudbay uusan shuruudaha raacin, booliiska ayaa markale xiri kara.

Haddii aad ka cabsi qabtid in uu dhibaato ku gaarsiiyo marka xabsiga laga soo daayo, waxaad ku talagashaa in aad heshid meel amni leh ee aad joogtid, sida hoyga badbaadada haweenka.

## Maxaa dhacaaya haddii booliiska ay eedeyn ku soo rogaan qofka xadgudbka geystay?

Haddii qofka xadgudubka geystay uu caddeysto in uu yahay dambiile idin weeraray adiga iyo carruurtaada, maxkamadda ayaa xukmin doonta. Wuxuu xukunka noqon karaa ganaax, tijaabo gelin, muddo xabsi ah, ama isku-dar ah waxyaabahaasi. Qofka xadgudubka geystay ayaa suuragal ah in uu latalin helo taasoo qayb ka ah tijaabo gelinta. Haddii xabsi lagu xukumayo iyo haddii kale waxay ku xiran tahay dhowr waxyaabood sida haddii ay tani tahay dambiga hore iyo inta uu la eg yahay dhibaatada uu xadgdudubka geystay. Haddii aad cabsi qabtid, waxaad u sheegtaa qareenka xeer ilaalinta. Haddii tijaabo gelin lagu xukumo, waxaa suuragal ah in maxkamadda ay shuruudo ku xirto sii deyntiisa.

Haddii qofka xadgudubka geystay uu sheegto in uusan dambiile ahayn, waa in aad marqaati ka noqotid maxkamaddiisa. Waxaa suuragal ah in laguu oggolaado in aad marqaati la timaad adigoo meel daahsoon ku jira ama qol kale uu talefishin yaal si aadan u arag qofka xadgudubka kuu geystay. Sidoo kale waxaad kuu suuragaleysa in uu kula joogo qof taageero ku siiya inta aad ku marqaati furaysid si aad degganaan u heshid.

Waxay qaadan kartaa dhowr bilood inta aysan maxkamadda billaaban. Haddii ay maxkamadda dambiga ku soo oogto qofka xadgudubka geystay, waa la xukumayaa. Waxaad weydiisan kartaa qareenka xeer ilaalinta adeegyada dhibbanaha ee gobolkaaga ama deegaanka si laguu caawiyo iyo micneeyo nidaamka maxkamadda.

### Miyaa qofka xadgudubka geystay laga saarayaa Canada?

Haddii qofka xadgdubka geystay uu haysto jinsiyadda Canada ma laga saari karo Canada. Haddii qofka xadgudubka geystay uu yahay qaxooti ama haysto sharciga degganaanta joogtada ah, waxaa suuragal ah in dalka laga saaro haddii maxkamadda ay ku soo oogto dambiga weerarka ama dambiyada kale ee waaweyn. Amarka dalka looga saarayo waxaa lagu bixin doonaa dhageysiga socdaalka oo la qabanaayo xukunka kaddib. Hase ahaatee, nidaamka dalka looga saarayo wuxuu qaadan karaa muddo dheer.

## Jirdilka ma aha nooca kaliya ee xadgudubka

- ☐ Miyuu caadi ahaan qofka xadgudubka geysto cillad kugu arkaa ama uu ku yiraah qiime ma lihid?
- ☐ Miyuu qofka xadgudubka kuu geysto diidaa in aad asaxaab kuu gaar ah yeelato?
- ☐ Miyuu qofka xadgudubka kuu geysto kaa hor istaagaa in aad reerkaaga aragtid?
- ☐ Miyuu qofka xadgudubka kuu geysta kuu diidaa in aad guriga ka baxdo?
- ☐ Miyuu qofka xadgudubka geysta kugu cabsi geliyaa hadalladiisa?

## Haddii lagugu xadgudbo

- Keligaa ma tihid.
- Adigu khaladka ma lihid
- Waxaad heli kartaa gargaar.
- Waa in aad badbaadisid naftaada iyo carruurtaada.

## Waxyaabaha aad qaadan kartid haddii aad isaga tagayso

Haddii ay timaad xaalad degdeg ah, sida ugu dhaqsida badan u baxso. Ha u joogsan in aad qaadato waxyaabaha ku yaal liiskaan – iska baxso. Balse haddii aad waqti haysatid, waxaad tijaabisaa in aad qaadato waxyaabahaan badankooda intii aad kartid.

- ☐ dukumeentiga muhiimka ah sida shahaadooyinka dhalashada, baasaboorada, waraaqaha jinsiyadda, waraaqaha socdaalka, waraaqaha haysashada carruurta, amarrada maxkamadda (sida amarka ammaan gelinta), kaararka caafimaadka, kaarka caymiska bulshada, iyo lambarka caymiska bulshada ee qofka aad is qabtaan ama saaxibka tihiin
- ☐ lacag, kaararka amaahda
- ☐ buugga jeegagga, buugga bangiga, saamiga kaydka
- ☐ buugga gaarka ah ee taleefoonada iyo cinwaanka
- ☐ daawooyinka
- ☐ fureyaasha guriga
- ☐ laysanka darawalka iyo fureyaasha baabuurka
- ☐ alaabta lagu ciyaaro ee ay carruurtu aad uga helaan
- ☐ dhar dhowr maalmood loogu talagalay
- ☐ majawharaadka qiimaha leh

Haddii aad ku fakarayso in aad baxsato, waxaa fikrad fiican ah in aad aruursato waxyaabahaan qaarkooda oo aad gashatid meel badbaado leh, haddii ay dhacdo in aad degdeg u baxsatid.

# Ereyada loo isticmaalay buug warbixineedkan

### weerar

Wuxuu weerarka dhacaa marka qof uu adeegsado awood ama hanjabaad in awood loo adeegsan doono qof kale iyadoo uu qofkaasi ka raalli ahayn. (Oggolaanshada awoodda loo adeegsado ama cabsi gelinta ma ahan oggolaansho run ah.)

### dhageysiga damiinashada

Waa nidaam maxkamadeed oo la qabto kaddib marka qof la xiro oo eedeyn lagu soo rogo. Maxkamadda waxay go'aansataa haddii qofka shuruudo lagu sii daynaayo, sida marka loo sheego in uusan xiriir kula yeelan, ama xabsiga lagu haayo illaa ay maxkamadda xal uga helayso eedeymaha.

### dambiga dhibidda

Haddii aad cabsi ka qabtid in uu qof si noqnoqod leh uu kuu dabagalo ama uu kula soo xiriiro, ama uu ku eeganayo ama uu idinkula dhaqmo adiga ama carruurtaada si hanjabaad leh, wuxuu ku kacayaa fal dambi ee loo yaqaan dambiga dhibidda. Waxaa mararka qaarkood loo yaqaan dabagalka.

### Qareenka xeer ilaalinta

Qareenkani wuxuu matalaa dawladda. Qareenka xeer ilaalinta wuxuu kiiska soo hordhigaa maxkamadda marka fal dambi ah lagu kaco.

### haynta

Haddii aad carruurta haysid, waxaad sharci ahaan ka mas'uul tahay in aad gaartid go'aannada muhiimka ah ee korriinkooda iyo waxbarashadooda. Marka aad adigu haysid, carruurtaada caadi ahaan adiga ayeey kula nool yihiin, waxayna u badan tahay in ay abbahood booqdaan.

## gargaarka sharciga

Gargaarka sharciga waxaa laga helayaa qareenka ama xafiiska gargaarka sharciga, mararka qaarkoodna, waxay noqon kartaa bilaash. Waxaad la xiriirtaa adeegga tixraaca qareenka, xafiiska gargaarka sharciga, ama waxbarashada sharciga ee dadweynaha iyo ururka macluumaadka si aad u ogaatid meesha aad gargaarka sharciga ka heli kartid iyo haddii aad heli kartid gargaar bilaash ah.

## amarka ay soo saaraan maxkamadda qoyska ama madaniga

Haddii aad u cabsi qabtid amnigaaga, balse aadan booliiska gargaar ugu wacan, waxaad awooddaa in aad amar ka soo qaadatid maxkamadda madaniga ama qoyska taasoo amraysa in qofka kugu xadgudbo uu kaa fogaado. Waa in aad gargaar sharciyeed heshid si aad u kala ogaato noocyada amarrada maxkamadda madaniga iyo qoyska ee aad ka helayso gobolkaaga ama deegaanka.

## amarka ammaan gelinta

Haddii aad u cabsi qabtid amnigaaga, waxaad heli kartaa amarka ammaan gelinta. Kani waa amar ka soo baxa maxkamadda dambiyada oo shuruud ku soo rogaysa qofka kugu xadgudba. Tusaale ahaan, qofka kugu xadgudba waxaa suuragal ah in laga mamnuuco in uu ka arko, qoraal, ama taleefoon kuu soo diro. Haddii uu amarka jebiyo, booliiska ayaa suuragal ah in ay xiraan. Haddii aad doonayso in aad wax dheeraad ah ka ogaato amarka ammaan gelinta waxaad weydiin kartaa qof qareen ah.

## tijaabo dembiile

Kani waa amar ka soo baxa maxkamadda dambiyada oo qayb ka noqon kara xukunka lagu soo rogo dembiilaha. Qof ku jira tijaabada dembiilaha waxaa lagu soo daynayaa shuruudo, sida in uu tago fasallada latalinta.

# Liiska Ilaha Bulshada

Waa ra'yi fiican in – hore – loo sii diyaarsado liis gaar ah ee ilaha bulshada. Waxaa booliiska raacsan, dhowr hay'adood ee ku siin kara taageerada ama macluumaadka ku caawinaya. Waxaad ka eegtaa buugagga taleefoonka ee caddaanka, huruudda ama baluugga lambarrada taleefoonka ee hay'adaha deegaanka ama gobollada ee soo socda. (Waxaad hubisaa in ay lambarradaan sax yihiin, maadaama ay isbeddeli karaan markii muddo la joogo.)

| Ilaha Gargaarka | Lambarka taleefoonka |
|---|---|
| **Booliiska**<br>Waxay kaa caawini karaan qiimeynta amnigaaga si ay tallaabo uga qaadaan qof dembi galaaya | **(911 haddii ay jirto xaalad degdeg ah)**<br>____________________ |
| **Ururrada waxbarashada sharciga ee Dadweynaha**<br>Waxay bixin karaan macluumaad guud ee ku saabsan sharciga, nidaamka sharciga, iyo xuquuqda aad leedahay haddii aad tahay qof dhibbane ah. | ____________________ |
| **Adeegyada dhibbanaha**<br>Waxay tixraac kugu diri karaan latalin waxayna kuu sheegi karaan barnaamijyada iyo adeegyada loogu talagalay dhibbanaha dembiga. | ____________________ |
| **Khadadka dhibaatada**<br>Waxay kaa caawini karaan soo dhexgalka dhibaatada waxayna tixraac kugu diri karaan adeegyo ku caawiya. | ____________________ |
| **Guryaha ku meel gaarka**<br>Waxaa laga heli karaa hoy, macluumaad iyo tixraac loogu talagalay haweenka ay dhibaatada ka soo gaarto xadgudubka uu u geysto qofka ay is qabaan. | ____________________ |

**Xafiiska caafimaadka maskaxda**
Waxay ku siin karaan macluumaadka ama latalinta niyad jabka, kadeedka, iyo arrimaha caafimaadka maskaxda. ____________________

**Hay'adaha adeegga hijrada iyo jaaliyadaha kala dhaqanka duwan**
Waxay ku siin karaan macluumaad ama tixraac kugu diri karaan adeegyada ku caawini kara. ____________________

**Qaybta Hijrada iyo Jinsiyadda Canada**
Waxay ka jawaabi karaan su'aalaha ku saabsan heerka uu maraayo sharciga hijrada iyo nidaamka, waxayna ku siin karaan warbixin ku saabsan Sharciga Badbaadada Qaxootiga iyo Hijrada. **1-888-242-2100**

**Adeegyada gargaarka sharciga**
Waxaad u qalmi kartaa barnaamijka gargaarka sharciga ee gobolkaaga kaasoo bilaash ugu fadhiya reerkaaga, arrimaha sharciga madaniga iyo hijrada. ____________________

**Dadka aan ku kalsoonahay**
Reerka, asaxaabta, takhtarka, ama lataliyaha diinta ayaa laga heli karaa taageero xagga niyadda ah iyo mid waxqabad leh. ____________________

**Wax kale**
Waxaad raadsataa ilo kale ee ku caawiya! Tusaale ahaan, waxaad caawinaad ka heli kartaa xarunta haweenka ee deegaanka, xarunta daryeelka bulshada, iyo kuwo kale. ____________________